Cinwaanka Daraasadda

# Raaddadkii iyo Joogitaankii ilbaxnimadii reer Saba ee xeebaha Soomaaliyeed

**Ku saabsan qoraaga**

Mahad Siciid Maxamuud Jebiye: oo ah cilmi baare madax banaan oo ku takhasuusay deegaanka iyo Asaarta kana tirsan cilmi baarayaasha hay'da PDRC.

**Dulucda qoraalka**

Tan iyo markii uu soo ifbaxay dhiganihii yaabka lahaa ee dalmareenkii Giriiga ee "Periplus of the Erythraean Sea" [1] (ερίπλους τῆς Ἐρυθρᾶς Θαλάσσης) oo si weyn loogu faahfaahiyey ganacsigii xabkaha iyo Cananada[2] udgoonka iyo alaabooyinkii kale ee naadirka ahaa ee laga dhoofinayey xeebaha dhulka Soomaalida. Taasi oo ku aadaneyd waagii uu daahfuray luqad yaqaankii mucjisada ahaa ee "Jean-François Champollion"[3] fartii Masaaridii hore ee "Hieroglyphs" markaasi oo la ogaadey safaradii dhaadheeraa ee Masaaridii fircooniintu ay ku tageen dhulkii Ilaahyada Punt. Dhulkaasi oo lagu abaaray inuu ahaa xeebaha Soomaalida, ilaa waayadaas waxaa isa soo tarayey baaritaano iyo dadaallo lagu raadinayey daliilo iyo waxyaabo la taabankaro oo la xiriira ganacsigaasi iyo ilbaxnimadaasi hore. Qoraalkaan iyo helitaanka raaddadkii hore ee reer Saba ee geyiga Soomaalidu waxaa uu ka dhiganyahay daahfurkii ugu weynaa ee abid la xiriira arimahaasi aan kor ku soo xusnay. Waxaana ay ka dhigantahay inaan anaguna markeena si wanaagsan uga qayb qaadanayno soo bandhigida taariikhda iyo degel yaalkii hore, taasi oo runtii ku mudaysan isku day wacan iyo guul inoo soo hoyatey dhamaanteen.

## 1| Hordhac:

Sida uu ku sheegay taariikhyahankii weynaa ee reer Giriig Strabo[4] buuggiisii caanka ahaa ee ***Geographia,*** waxaa jirey ilaa shan macbad (goobo) wax lagu caabudo inta u dhexeysa Saylac ilaa iyo Raas Xaafuun ee xeebaha dhulka Soomaalida, xiligaasi oo ku beegnaa ilaa laba kun oo sano (2000) ka hor. Strabo waxa uu sheegay in loogu yeeri jirey meelahaas ,Biisuulaay, Liiya, Biifaangeel, Libaax iyo Haramoota, waxayna ahaayenn qaar leh tiirar dhaadheer oo qurxoon[5].

Dalmareenkii reer Faransa ***Georgess Revoill*** ayaa isaguna markiisa ku arkay magaalada Olog[6] sida uu sheegay dhisme uu garan waayey, kaas oo u eg dhismayaashii hore ee wax lagu caabudi jirey.

Hadaba kolkii aad u fiirsato Qubuurihii Bulshooyinkii deganaa mandiqadan habka ay u xabaaleen kuwoodii geeriyooday oo ay muruq iyo maal badan u geliyeen, waxaad ka minfalaadeysaa (fahmaysaa) in dadkii arladaan ku noolaa waayadii taariikhda ka horeeyey ay ahaayeen qaar wuxuun aaminsan oo aaney ahayn cawaan wax ma garato ah.

Waxaan sidaa u leeyahay iyadoo ay muuqato inay u badnaayeeyn ama ahaayeenba Kaluumaysato ban jooga oo aan qalab fiican haysan ama sida badan xoolo raacato socoto ah, oo ay yartahay inaad aragto dhismayaal iyo magaalooyin hore oo ay ka tageen haddana aad ayey u ixtiraameen kuwoodii geeriyoodey.

[1] Waa qoraalkii ugu horeeyey Adduunka ee si faahfaahsan uga hadla ganacsiga iyo wax isweydaarsiga bulshooyinkii ku xeeraa Badda cas ilaa Hindiya ilaa Khaliijka Faaris, waxaa la qoray muddohaatan laga joogo ka badan laba kun oo sano waxaana ka tegey badnmareen Giriigii Masar oo ka soo shiraacday Magaaladii Berenice ee dalka Masar.

[2] Dheecaanka ka yimaada geed Quwaaxyada (Cimmophora) kuwaas oo inta badan la shido si looga helo qiiq udgoon

[3] Waxaa uu ku takhasusay farihii qadiiimiga ahaa ee bariga sida Carabiga Giriiga iyo afka Yuhuuda ugu dambayntii isagoo da yar ayuu yimid Masar waxaana loo nisbeeyaa inuu yahay qofkii fahmey oo daahfuray sida loo akhriyo luqadii Masaaridii hore (Hieroglyphs).

[4] Tariikhiyo juqraafiyahan waayadii calasikada……

[5] Geographia, book 16 chapter 4 page 16

[6] Degmo yar oo dhanka galbeed ka xigta ras gurdafui,iyda iyo tan ku dhegan eedaamo waxaa la aaminsanyahay inay tahay halkii xetsebshuut ka soo degtey machadka geeska Africa ee ingiriisjka ayaa ka helay alaabooyin laga keenay rooma.

Taasi waxay daliil buuxa u tahay inay ahaayeen qaar aaminsan caqiidooyin u gaar ah, gaar ahaan waxaan fahmaynaa inay aminsanyeen jiritanka Nolol kale oo ka dambaysa tan ay markaa joogeen.

Dadka iyo dalka Soomaalidu waxay iskaga mid yihiin inay yihiin mid ka mida meelaha weli dihin Dunidan guudkeeda oo aan wax badan laga ogayn, gaar ahaan aanay ka ogaan degel baarayaasha Dunidu. Sababtu waxaa weeye iyadoo labadii qarni ee ugu dambeeyey ee Aqoonta Dadka Aduunku kobocday, ay ahayd Mandaqad aan deganayn. Taasi oo adkaysay in baaritaano dheeraad ah lagu sameeyo haddii ay noqoto meel ka soo jeedka Dadka, Taariikhda Dhulka iyo cidii deganaan jirtey iyo isbedelka dhaqan dhaqaale ee Bulshooyinkan ku dhacay Qarniyadii is xigay ama kala dambeeyey.

Dadka Soomaalida inta la garanayo waxay ahaan jireen Mujtamac dhaqan iyo dhaqaaale ahaan isku filan maadaama ay ahayeen kuwo ku tirsan raacashada xoolaha dabjoogta ah. Waxay aqoon badan u lahayeen xagga Saadaalinta cimilada, Cilmiga Bulshada iyo Dhirta. Waxayna xusuus badan u lahaayen xagga taairiikhda iyo dhacdooyinkii hore. Waxaaas oo dhanse waxaa waxba la'aan ka soo dhigay iyadoo aaney waxna qori jirin waxna akhrin jirin, iyadoo la yiraahdo Dabarka Cilmigu waa qoraalka. Waxaan garawsaday haddii ay qori lahaayeen waxyaabihii ay garteen ee ay ku ogaadeen kasiistoodii qarniyo badan, maanta waxaan ahaan lahayn mid ka mida bulshooyinka loo iilo qaar ka mida culuumta banii aadamku helay. Nasiib darrose ma dhicin taasi marki dabarkii la waayey, jaahilnimadaasi waxay ina dhaxalsiisay hubaal la'aan ku saabsan taariikhdeenii hore iyo aqoontii ay ku gaareen tijaabooyinkii isdaba jooga ah ee ay sameeyeen bulshooyinkeenii hore.



*SAWIR 1* *Haraadigii Macbadkii Illaaha (Sanamka) Almiqah ee magaalada Sarwaax xaruntii hore ee boqortooyada Saba*

## 2 | Ilbaxnimdii Saba iyo Ximyar.

Markii aad maqasho Qoomkii Reer Saba, waxaa markiiba maskaxdaada ku soo dhacaya Aayadaha Quraanka ee ku jira Suurada loogu magac daray (Suuratul Saba)[5]. Taasi oo laga yaabo inaad marar badan akhrido, oo warbixin buuxda inaga siisay boqortooyadii iyo ilbaxnimadii dadkii reer Saba ee ku nolaa koonfurta Jasiirada Carabta, gaar ahaan dalka haatan loo yaqaaan Yaman[6]. Barwaaqadii ay ku noolayeen waayo badan iyo burburkii ku dhacay biyo xireenkoodii weynaa ee Ma'rib[7], arinkaasi oo dhaxalsiiyey inuu burburo nidaamkii beeraha ee ay ku noolaayeen dabadeedna ku qasbay inay ka qaxaan dhulkoodii;[8]

Waxaa xusid mudan in kutubaha diimaha Samaawiga ah dhamaantood lagu xusay qaybo ka mida Taariikhda reer Saba[9]. Hase yeeshee marka kutubta muqadaska ah laga yimaado, waxay ka tageen raadad aad u waaweyn oo Qoraallo iyo dhismayaal aan duugoobin oo ay ku daaleen Culimada degel baarku, waayo bandanna ay ka soo faqayeen dhulka hoostiisa sida ***Edward Gluser, Homels, Wendel Philips, Harry St. John Bridger Phillby),*** iyo qaarkaloo badan.

Boqortooyadii iyo Dadyowii Reer Saba waxay ka soo daahireen Koonfurta Jasiirada Carabta toban qarni ka hor dhalashadii Ciise taasi oo u beegan muddo haatan laga joogo ilaa saddex kun oo sano. Dadka taariikhda faaqida qaar baa ka horaysiiya mudadaasi, hase yeeshee la iskuma raacsana. Waxayna ahaaayeen kuwo hodan ah oo khayraad badan haystey, sida ay sheegeen Taariikhyahanadii Giriiga iyo Roomaankii hore, xaruntoodiina waxay ahayd magaalada Sarwaax ee gobolka Ma'rib ee dalka Yeman. Horaaantii taariikhdooda waxay Caabudi jireen Ilaahyo(Sanamyo) kala duwan oo ay u cibadaysan jireeen sida- Almiqa, Casastar, Wud, Xidigta Waxaraxirta iyo Awoowayaashoodii hore. Waxaana xakumi jirey horaantii taariikhdooda wadaaddada ama kaahiniinta Macbadyada. Kuwaasi oo logu yeeri jirey ***Makrabiyiin***. Waxayna xukunka hayeen ilaa qarnigii Lixaad Ciise Hortii. Kolkaas oo habkii xukunkoodu isu bedeley Boqortooyo[10] .

---

[5] Quran karim, suratul saba aayah 15 - 21,

[6] Yaman waddan ka mida waddamada carbeed,woqooyi iyo galbeed waxaa ka xiga boqortooyada sucuudiga barina saldanada cumaan koonfurna badda cas,

[7] Dhawr jeer ayuu karkaarada jabsaday biyo xireenku kii ugu dameeyey waxaa u ahaa 450 CD.

[8] Z wei Inschriften Uber Den Dammbruch Von Marib, In Mitteillungen Der Vorderasiatischen Gesellschaft, Ii, "1897", S. 372, Seper., S. 13, Le Museon, 1964, 3-4, P.493

[9] دكتوره بلقيس ابراهيم الخضراني/الملكة البلقيس، التاريخ،والاسطورة، والرمز، صفحه 33


[10] حمد عبد القادر بافقيه، تاريخ اليمن القديم ص 57

Hase yeeshee waayo dambe ilaa Qarniyadii dhexe, waxaa ku faafay diinta Yuhuuda inkastoo dadka taariikhda faaleeya ay isku khilaafeen xiligii ay ahayd, waxaase la sheegaa in boqortooyadii Ximyar, oo la ologa ahayd tii Saba, inay gebi ahaanba Yuhudiyiin ahayeen. Sidoo kalena waayo dambe diinta Masiixiga ayaa kaga soo faaftay dhanka Najraan oo hadda ka tirsan dhulka Succuudiga, taasi waxay ka caraysiisay Boqorkii Ximyar ee wagaas, oo cadaadiyey kiristaankii.

Arinkaas waxaa ka dhashay gurmadkii boqortooyadii Aqsum[12] ee xabashida, iyagoo caawinaad ka helaya boqortooyadii kiristaanka Roma ee **'Byzantine'** ayey qabsadeen Yaman, waxayna ka talinayeen ilaa nus qarni sida taariikh yahanadu xuseen. Markii dambena boqorkii lagu magcaabi jiray ***Seyf Bin Dii Yasin***, isagoona markiisa kaashanaya boqorkii Faaris ee loo yiqiin ***Kisraa Anuu Sharwaan***[13] ayuu iska xarooyay eithpian-kii ku soo duulay.

Saldanadoodii waxay ahayd mid Federal ah oo ka kooban reer Saba iyo Saldanadii Qatabaaniyiinta iyo Maciin iyo Xadarmuut.[14,15] Waxay ahayeen kuwo hodon ah sida ay sheegeen tariikh yahanadu iyagoo dhexyaal u ahaa Ganacsiga Fooxa iyo Bukhuurka ka bixi jirey Koonfurta Jasiirada Carabta iyo qaar ay Soomaaliya ka soo dhoofin jireen. Waxayna ahaayeen kuwo ilbaxnimo sare leh, oo qori jirey Farta loo yaqaan **'Musnad'**. Taasi oo ka horay-say xuruufta Carabiga ee hadda aan naqaano. Qoraalladii ay ka tageen oo ay ku xardheen meelo kala duwan sida dhismayaasha Macbadyada, buuraha dhadhaabaha ah iwm, ayaa muujiyey wax badan oo tariikhdoodii ah oo si fiican loo fahmi karo maanta. Taasi oo Culimada Taariik-da iyo degel baarka aad u caawisay. Qaybtii hore ee taariikhdooda waxa ay u qori jireen fartooda si gaara ah oo ay Culimada faraha qadiimiga ahi ugu yeeraan **Seyr Mixraas**, taasi oo ka dhigan sida Dibiga Beertu u socdo, macnihii iyadoo lagabilaabayo Bidix laguna geynayo Midig, haddana lagu soo celinayo bidix iyadoo qoraalku is'haysto. Waayadii dambese, waxay u bedeleen sida hadda loo qoro Carabiga oo ah in Bidix laga bilaabo Midigna lagu dhameeyo. Taasi waa mid lagu garto qaar ka mida xiliga la qoray Qoraallada Dhagxaanta ku xardhan ee degel baarayaashu soo saaraan .

فرتزل هومل تاريخ الممالك العربية الجنوبية القديمة ص 64



*SAWIR 2 Sawir muujinaya markii Dhulka hoostiisa laga soo faqayay Macbadkii waynaa ee Maxram Balqiis 1951-1952 American Foundation of Human Studies directed by Wendel Philips.*



*SAWIR 3 Haraadigiii Macbadkii Qoqorada Balqiis (Maxram Balqiis) Gobolka Ma'rib*



*SAWIR 4 Waxii ka sii haray Macbadkii weynaa ee "Al miqqah" ee Woqooyiga Itoobiya waxaa la dhisay qiyaastii qarnigii 7aad Ciise hortiis waxaana la dhisay xiligii Boqor Karba'iil Yathar Amar Wathar*

[12]Boqortooyo ka dhisned Itoobiya qarnigii 2aad ilaa kii 10aad Ciise dabadii

رئيف; خوري (). مع العرب: في التاريخ والأسطورة [13]

[14, 15] temples of Ancient Ḥaḍramawt. Pisa University Press. 2005. PAGE 68. .

## Muhiimada Taariikheed ee ay leedahay helitaanka Macbadka Nabada (Salamantun) ee Xeebaha Gobolka Bari

Sidaynu hore u soo sheegnay xeebaha dhulka Soomaalida waxaa ku teedsan magaalooyin caan ah marka laga eego xagga taariikhdii hore, kuwaasoo xarun u ahaa dhoofinta waxyaalaha ka soo baxa dhirtii Eebbe ku manaystay dhulka[16]. Sidaasi daraadeed waxaa markasta taariikh yahanadu ka sheekeeyaan xiriirkii ay dadyowgii Xeebaha dhulka Soomaalida ku noola ay la lahaayen bulshooyinkii hore gaar ahaan Faraciintii iyo Roamankii[17]. Hase yeeshee daliillada la taaban karo ee dhulka laga helo aad buu u yaraa, marka laga reebo waxyaalo aan badnayn oo laga helay goobaha qarkood. Kuwaasi oo aan ka xusi karo waxyaabihii ay ururiyeen Machadka Bariga Afrika ee Ingiriiska ee xaruntiisu ahayd Nairobi "British Institute in Eastern Africa." Kuwasoo baaritaano ku sameeyey magaalooyinka xeebaha Soomaliyeed sanadihii sideetamaadkii Qarnigan wax badan oo ay ka heleen oo ay ku jireen lacago hore iyo weelal Dhoobo Yurub laga keenay waayadii hore waxayna cadayn buuxda u noqdeen ganacsiga aan kor ku soo sheegnay ee kumanaan sano soo taxnaa[18] .

Sidaasi daraadeed daahfurkan cusub ee Macbadka Nabada (Salamntun) ee xiriirka la leh ilbaxnimadii Reer Saba waxa weeye kii ugu balaarna abid ee si dhab ah u muujinayey xiriradaasi hore, waxaa uu xoojinayaa Qoraalladii hore iyo mala'awaaladii qorayaasha Tariikhda. Waxaana uu daahfur buuxa u noqonayaa mid ka mida xiriiradii Dhaqan Dhaqaaale ee aan la lahayn Deriskeena Dhinaca kale ee Badda Cas. Dhigaalo fara badan ayaa jira oo cadaynaya xiriirkii Ganacsi ee ay la wadaagtay Boqortooyooyinkii Ximyar iyo Saba Geeska Africa. Hersi, Ralph E. Drake-Brockman etc.

Marka aad eegto Qoraaladan iyo waxyaabahan goobtan laga helay waxay ina tusinayaan in hawshaani ay ahayd mid heer sare ah marka la eego dhinaca Qorista Dhagaxaanta iyo habka Qoraalka. Taasi oo la heer ah farshaxankii iyo qoraaladii ay ka sameeyeen Xarumohoodii hore iyo Macbadyadoodii waa weynaa. Waxayna tuse wacan u tahay inay Shaqadan qabteen Dadkii ugu sareeyey Bulshadaasi waxayna meesha ka saaraysa in Dad bowsaday ay ahayeen kuwii dhisay Macbadka Nabadda ee Dekedda Kufka[19]. (Salamantun).

Xamaasad dheeraada ayey tani inagu abuureysaa waxayna Noolayneysaa rajada aan ka qabno inaan caddeyno in dhulka Soomaaliya uu ahaa mid Ilabaxnimo fog iyo Ganacsiba la lahaa Aduunyaddii gedoontey iyo meelihii ugu horeeyey ee Ilbaxnimada banii'aadamku ka soo bilaabatay sida Mosobetamia, Pheonocia, Egypty, Persia iwm.

Iyadoo khilaaf xooggan uu ka taaganyahay inay dadyow fara badani ku andacoodeen sheegashada dhulkii cajiibka ahaa ee Uduga (Punt), yoolkeena ugu dambeeyaa waxaa uu noqon doonaa sidii loo heli lahaa waxyaalo aan ku cadeyneyno joogitaankii iyo xiriirkii Masartii Fircoonada, inaggoo sii adkaynayneyna inuu Punt ahaa Dhulka Soomaalida, taageero buuxdana siinayna Culimada degel baarka iyo Taariikhda e sidaasi badidood aaminsan. Waxaan rajaynayaa inaan helo Sanamkii yaraa ee "Amon re" kaasi oo ***Hatshepsut*** kaga taagtey Xeebta halkii ay kasoo degtey oo noqon doona arinka uun soo afjari doona muranka Goobtii ahaan jirtay Dhulkii Punt.

### Muhiimada Raasiga Caseyr (Cape Guardafui) iyo Xiriiradii ay la Sameeyeen Ilbaxnimooyinkii hore

Raasi Casayr weligeed waxay ahayd Raasi ama Gacan Badeed Juqraafi ahaan muhiim u ahaa Badmaaxnimada Dunida inta la garanaayo, waxaa uu dhacaa mid ka mida Wadooyinka Ganacsiga dunida ugu muhiimsan waxaana weeye halka keliya ee ay ka majare qaataan Naakhuudayaasha Baddu, gaar ahaan kuwii hore ee aan qalabka fiican haysan. Waayadii hore ayey Romanka iyo Giriigii hore u aqoonsadeen inuu yahay halka ugu muhumsan ganacsiga
Fooxa (Frankincense), waxayna ugu yeeri jireen Aromata Promontorium (Greek: Αρώματον ἄκρον). Taasi oo ka dhigan "Geeskii Udgoonka."

Badmareenada Carabtu sida I***bnu Saidi, Suleyman Almahri, Ibnu Maajid*** iyo kuwo kaleeto, ayaguna waa ugu yeeri jireen Raasi Casayr, oo xarun u ahayd dhawr Ganacsi oo kala gedisan, gaar ahaan alaabooyinka ka imanayay Koonfurta xaga ay hada inakaga beegantahay Koonfur Afrika (South Africa) iyo kuwa ka imanaya Sayloon[20] ilaa Hindia iyo kuwa kale oo Dhulweynaha Hindiya ka imaan jirey dhinaca khaliijka Faarisiyiinta[21] iyo Wadanka Yaman iyo dhinaca Woqooyi ilaa Masar iyo Qaarada Yurub.

[16] The Aromatherapy Book by Jeanne Rose and John Hulburd pg 9

[17] The periplus of erythraean Sea"waa Qoraal uu qoray safar yahan girrig ahaa laba kun oo sano ka hor"

[18] chittick,neville(1975).an archaeological reconnaissance of horn;the british somali expedition p117_133. waxaa hogaaminayey h.neville chittick iyo robert i rotberg xafuun ayey ka heleen lacago iyo agab dhoobo ah oo ku taariikahaysa waagii grecko romans sidoo kalena olog ayey ka heleen qalab dhoobo ah oo waayo fog ah

[19]Dakad yar oo dabiici ah oo u dhaxaysa Raas Casayr iyo dagmada Baargaal waxaana lagu xusay dhiganaha qadiimiga ah ee "The Periplus of the erythrean sea" iyada oo loogu yeeray magaca **TABEA**.

[20] Waddanka hadda loo yaqaan Serilanka kaasi oo dhaca Bariga Hindiya

[21] Dhulka iyo Waddanka hadda loo yaqaan Iiraan

Dhulka Qowmiyada Soomaalidu dagaan oo ah mid aad u balaaran ka soo bilow Khooriga Tojjorra ilaa iyo Gaarisa, Diridhabe ilaa iyo Raas Kamboni, waxay ila tahay halka ugu istiraajisan inay tahay Raasigan Casayr ee dhaca figta ugu shishaysa Qaarada Africa. Waxaana weeye halka ay iska gooyaan Bado kala duwan Juqraafi ahaan waxaa uu ku beeganyahay, **11°49′N 51°15′E**. Waxaana uu aad ugu dhowyahay Jasiiradda caanka ah ee Suqadara,[22] Koonfur waxa ka xiga Gacanka kale ee caanka ah ee Raas Hafun ”apone”, galbeedna waxaa ka xiga buurta caanka ah ee” Cape Flex ama Boolimoog, markii aan maray oo aan u dhaba galay Muuqaalka iyo nooca Dhulka iyo Aasaraha ay kaga tageen Dadyowgii ku noolaa waayadii taariikhda ka horeyey, waxaan aad u aaminey inay halkani tahay Goob ka mida goobaha ugu horeeyey ee Aadanuhu degey waayadii sii horeeyey e libdhay. Sababaha u sahlay inuu Dadkii hore ee aan qalabka fiican haysani halkaan ku negaado, waxaan isleeyahay waxa aka mida:

1. Biyaha oo ah asaaska Noolaha oo dhan oo ay hodon ku tahay, marka laga reebo Roobabka Xiliyada da'a, hadana Illo badan oo iska qulqulaya ayaa ku badan agagaarka gacan Badeedkan.
2. Dadkii hore oo aan ku fiicnayn Beerashadu waxaa uu halkan ka heli karay Miro dabiici ah sida Canjeelka Gobka, Dhafaruurta, Murcanyada, Burdadka, Sadkaxda, Cilalka, Carmada iwm. Kuwaas oo uu si sahal ah ugu Noolan kareyeen Naftana ku maradhaarin kareyeen
3. Barwaaqada Dhulkaan Buuraleyda ah oo aaney tigaadu ka dhamaan oo u suuro gelisey inuu Xoolo Dabjoog ah, ku dhaqdo kagana badbaado Abaaraha dheerada oo ku dhacarto.
4. Maadaama aanu haysan aaladaha lagu Kaluumaysto, waxaa meeshaaan ku yaala Khooriyo yaryar oo si fudud Kaluun looga gaadi karo.
5. Waxay hoddon ku tahay kala duwanaanshaha Dhirta iyo Daaqa taasoo u sahashay Dadkaasi inay dhaqdaanxoolo Dab jog ah oo ay Noloshooda ku maareeyaan.
6. Godad waawey oo ay Dad iyo Duunyo kaga gaban karaan Masiibooyinka Dabiiciga ah sida Qabowga darran Duufaanaha iyo Roobabka. Isla mar ahaantaasna ay u isticmalaan kaydinta Xabkaha iyo Faleenka oo Qoraxda iyo Roobkuba u daran yihiin.

[22] Longhurst, Alan R. (2007). Ecological Geography of the Sea (second ed.). Burlington, Massachusetts: Academic Press. pp. 297–298.

Ariamahan aan kor ku soo xusnay dhamaantood waxay xoojinayaan Fikradda oranaysa in dhulkaasi uu ahaa mid uu Insaanku markii ugu horeeyeyba Caga dhigtay.

Waayadii horena waxaa la aaminsanaa in Dhulka la degan yahay ay ugu dambayso Gacanka Gardufuu (**Cape Guardafui**) sida ku cad Khariidadii ugu horeysey ee uu samaeeyey ***Herodots*** iyo tii ***Strabo***. Strabo waxaa uu yiri: *“after doubling this cape toward the south,we have no more descriptions of harbors or places,because nothing is known of the sea coast” (XVI, IV, 14).*


*“Kolkii aad ka wareegto gacan badeedka waxii koonfur ka ah wax tafaasiil ah kama hayno sida dekedo iyo goobo kale toona waxbana lagama oga”.*

Muddo haatan laga joogo in ka badan Laba Kun oo sano ( 2000) ayey ahayd kolkii badmaaxe jar iska xuur ahi uu ka soo dhoofay Dalka Masar halkaasoo markaasi ay Gacanta ku hayeen Roomaanku, iyagoo jeclaa inay markasta jilaan Masartii fircooniinta. Qoraalkaasi Badmareenkaasi sameeyey ayaa ah ilaa iyo iminka kan ugu qadiimisan uguna faahfaahsan Caalamkii hore, Badmareenkaasi waxaa uu ahaa kii ugu horeeyey ee ka gudbey Cape Guardafui islamarahaantaana ogaadey habka Dabaylaha Maansuunku u shaqeeyaan marka loo socdo Hindiya. Waxaa uu ku sheegay qoralkiisa isagoo ka soo shiraacday Magaaladii Mundus ama Mayr, soona maray Suuqii caanka ahaa ee Mssylon. Suuqaasi oo loo malaynayo inuu ku yaalay inta u dhaxaysa Ceelaayo ilaa iyo Rasi Hantaara, islamarkaasna uu ku hakaday Khooriga caanka ah ee Butiyaalo waxaa uu yiri:


*“Beyond this place,the coast trending toward the south, there is the Market and Cape of Spices,an abrupt promontory, at the very end of the Berber coast toward the east. The anchorage is dangerous at times from the ground-swell, because the place is exposed to the north. A sign of an approaching storm which is peculiarto the place, is that the deep water becomes more turbid and changes its color. When this happens they all run to a*
*large promontory called Tabae, which of Theris safe shelter. There are imported into this market town the things already mentioned ; and there are produced in it cinnamon and its different varieties,gizir, asypha, arebo,mag/a,and moto)and frankincense.*[23]

**Goobtan ka gadaal (Butiyaalo iyo Boolimoog) badu waxay u janjeersataa xaga Koonfurta halkaas oo uu ku yaallo Suuqa Xawaashka (Olok iyo Daamo) iyo gacan badeed (CAPE GUARDAFUI) aan la qiyaasi karin, halkani ay ku dhamaato xeebta Barbarayiinta ee dhanka bari, Marsadeedu waa khatar oo baroosin qabad ah ma leh maxaa yeelay waxay Afka ku haysaa Koonfur, markii Dabayluhu soo socdaan Biyaha ayaa dhawaaqma Midabkooduna waa is bedelaan, kolkaas Doonyuhu waxay ku cararaan Khooriga yar ee TABEA (Kufka) halkaasi oo ay ku badbaadaan, halkani waxaa laga soo dejiyaa waxyaalihii aan hore u soo sheegnay, waxaana laga soo saaraa Qorfe noocyo kala duwan ah, iyo GIZIR noocyo kala duwan ah, Asypha, Arebo, Maga, iyo Moto. Iyo Maydi.**

[23] HE PERIPLUS OF THE ERYTHR^AN SEA TRAVEL AND TRADE IN THE INDIAN OCEAN BY A MERCHANT OF THE FIRST CENTURY TRANSLATED FROM THE GREEK AND ANNOTATED BY WILFRED H. SCHOFF, a. m. Secretary of the Commercial Museum, Philadelphia
Priblus of the ertheran sea page26




SAWIR 5 *(Khariidadii Herodotus-2400 Sano ka hor ) Waa tii ugu horraysay ee uu Bini Aadamku sameeyo, Wuxuu aaminsanaa halka ugu danbaysa ee la Deganyahay inay tahay Raas Casayr.*




SAWIR 6 *(Strapo Map) Tani waa mid ka midah Khariidadihii ugu horreeyey ee Bini Aadamku sameeyo wuxuuna ku muujiyey Raas Casayr inay tahay halka ugu danbaysa ee Bini Aadamku Deganyahay muddo laga joogo 2000 oo sano ka hor.*

Waxa aad ii soo jiitay runtii Qoraalkii ku saabanaa Raasi Gardafuu (Cape Guardafui) ee ku qoray Dalmareenkii Bortuqiiska ahaa ee Duarte Barbosa muddo haatan laga joogo Shan-Boqol iyo xoogaa Sano (500 plus), markii uu marayey xeebaha Soomaaliya. Wakhtigaas oo uu ka soo shiraacday Raasiga kale ee caanka ah ee Raas Xaafuun APONE ayuu sidan ku yiri Buugiisa "description of the coasts of east Africa and Malabar"

*''after passing this place the next after it CAPE GURDAfUN, where the coast ends, and trend so as to double toward red sea. this cape is the mouth of streat of Mecca, and all the ships which came from india, that's to say, from the Kingdom of Cambay, of Chaul, Dabul, Baticala, and Malabar, Cylon, Chromandel, Bangal, Sumatra Poggru, Tanaseri, Mallaca, and China. All came to meet at this Cape, and the from it and they inter in to the before mentioned red sea with their merchandise, for Aden, Berbera Zeyla and Guida the Port of Mecca, for wich Ships the Ships of the king of Portugal some times go and lei in wait and take them with all their rihes''*[24]

*Goortii aad dhaafto goobtaan (Ras Xafuun) waxaa ku xiga "Cape Guardafun" halkaasi oo Badani ku dhamaato una qaloocato xagga Badda Cas oo u kabilowdo Afaafka jidka laga galo Dekedda Makka dhamaan Doonyaha ka yimaada Hindiya waa sida loogu yeero'e,iyo Boqortooyada Cambay, ee Chaul,Dabul, Baticala, iyo weliba Malabar, Serilanka,Charomendel, Bangal, Sumatara, Poggru, Tanaseri, Mallaca iyo China. Dhamaantood halkaan ayey ku kulmaan badda cas ee aan hore u soo sheegnay iyaga iyo shixnadohoodu goobtaan ayey ka sii aadaan Berbera, Zeylac, Aden, iyo Jidda oo ah dekaedda Maka, halkaasoo mararka qaarkood ay maraakiibta Boqortooyada Bortuqiisku ugu gabadaan oo ka sugaan si ay uga dhacaan Khayraadka ay wadaan.*

Inta la ogyahayna waxaa la aaminsanaa inay ahayeen Roomaankii iyo Giriirgii hore kuwii bixiyey Magaca caanka noqday ee (Cape Aromat) oo laga wado Geeskii ama Raasigii Udgoonka.

SAWIR 7 *Qariirada Dhulka Soomaalida uu ka muuqdo Gacan Badeedka Cape Guardafui*

[24] "Duarte Barbosa" "description of the coasts of east Africa and Malabar" page16

Hase yeeshee daahfurka Raadadka iyo Qoraallada Reer Saba ayaa ka dhigaya in Kumaanan Sano ka hor Romaan-ka ay ahayd meel ganacsi oo Dad badani wax isku wey-daarsan jireen. Waxay weligeed ahayd Goob ay ka majare qaataaan Naakhuudayaashii Doonyaha ka imanayay xagga Hindiya ee u socda Galbeed sida Masar iyo waxii kas ii shisheeya ama kuwa ka imanaya ee u socda Bari ilaa iyo Arlada Shiinaha am kuwa u socda xaggaa iyo Raasiga Rajada ama Khaliijka Faaris. Taariikho dhaadheeer oo aanan halkan kaga bogan karin ayuu leeyaahay, waxaana uu olog la leeyahay Raasiga kale Caanka ah ee Raas xaafuun (Apone).

Raasi Asayr (*Cape Guardafun)* waxay ahayd Goob muhiiim u ah Ganacsiyadii hore ee Aduunka sababahan hoose daraadoood

1. Biyaha oo aaad ugu badan Dhulka ku hareeraysan Raasiga, halkaasi oo ay Illo qulqulaya iyo Ceelal Cacan ku qod ah aad ugu badnaayeen.
2. Dekedo dabiiciya oo Doonyuhu ay kaga gaban karaan Dabaylaha maansuumka ee meelahaan ka dhaca laga rari karo Badeecooyin lagana soo dejin karo.
3. Dhirta qaaliga ah sida Yagcarka laga soosaaro Xabag-ta Maydiga, Beeyada oo ah Geed kale oo aan ka dhicin oo Xabagtiisa dibedaha loo dhoofiyo.
4. Miraha oo agaagarka Raasiga ka baxa oo si fudud loo heli karo.
5. Dhirta Xabag Macaanta sida Cadaada iyo Xankook-ibka oo meeshaan ku badan.
6. Dhir kale oo Udgoon aan meeelo ka fogeyn sida Falafalaxda, Murkudda iwm laga helo ama ka baxa.
7. Geedka Dhamaska oo halkaan aad uga baxa oo muhiim u ahaa sameynta Doonyaha laf dhabarta u ah Ganacsiga Adduunka.


Waxyaabahani oo dhan ayaan sabab u noqon kara inay soo jiiteen Reer Saba iyo Dadyow kale oo badan oo Adduunka isaga yimid oo Goobtan Ganacsi iyo wax iswedaarsi u yimid, Cadaymo Fara badan ayaa laga helay Raasiga kale oo ku dhow Goobtan ee Raaa Xaafuun iyad-doo Sanadihii Siddeetanaadkii ( 80s) Machadka Degel Baarka ee Ingiriisku ka heleen Qalab iyo Lacago muuji-naya Raadadkii Fircooniintii Masar iyo Hindiya, Roomaankii iyo Xadaaradihii Islaamka ee hore.

Haddaba sidaan hore u soo sheegnay daahfurkani waxaa u ka koobanyahay Qalab Dhagxaan ka samaysan iyo Qoraa-lo si qurux badan loogu xardhay dhagxaantan oo si fiican loo Qoray iyadoo Dad farsahaxano ahi ay ka dambeeyeen hawshaas. Marka arimahan oo dhan la eego Dadkaani waxay ahaayeen Dabaqad Sare.

Waxyaabahani oo dhan ayaan sabab u noqon kara inay soo jiiteen Reer Saba iyo Dadyow kale oo badan oo Addu-unka isaga yimid oo meeshan Ganacsi iyo wax iswedaarsi u yimid, Cadaymo Fara badan ayaa laga helay Raasiga kale oo ku dhow goobtan ee Raas Xaafuun iyaddoo Sana-dihii siddeetanaadkii (80s) Machadka Degel Baarka ee Ingiriisku ka heleen Qalab iyo Lacago muujinaya Raadad-kii Fircooniintii Masar iyo Hindiya, Roomaankii iyo Xadaaradihii Islaamka ee hore.

Qoraaladan aan dhowaan ka helay Agagaarka Raasiga Casayr ayaa muujinaya joogitaan Xoog leh oo ay ku lahaayeen Reer Saba Dhulkaan istraatijiga ah ee Xeebah Bariga Soomaaliya. Hadaba goobtaan oo sidaa uga fogayn Xeebta Badda Hindiya oo Koonfur ilaa Toban Kilometer kaga began Raasigan, ayaa waxa ay ka kooban tahay Saddex Qol oo asaasyadii weli dhisan yihiin. Kuwaas oo qaabka xarafka L loo sameyey mid ahaantiina uu ku fadhiyo 7mx5m iyo kan kale oo cabirkiisu dhanya-hay 6mx5m kan sadexaadna xoogaa ayuu ka yaryahay. Asaasyada oo ka samaysan Dhagxaan si farsamo aad u saraysa loo qoray oo aad u malaynayso in miishaaro casriya lagu jaray, ayaa cabir ahaan badidood loo jarjaray 0.64cmx0.64cm dhinac walba. waxa kale oo halkan laga soo saaray labo dabqaad oo bukhuurka iyo fooxo in lagu shido loogu talogalay marmarka ay ku Cibaadaysan-ayaan goobta, weel aan weyneyn oo Dhoobo ah iyo dhagax weyn oo sidii Sariirtii Laba Madax loo sameeyey. kaas oo ahaa halkii Qowraca Xoolaha Qurbaanta ah, waa Weel dhoobo ah oo weyn oo se burburay oo u baahan in la isku Ururiyo iyo Dhagax kale oo wayn oo loo sameeyay sidii Sariirtii kaas oo loogu talagalay Gowraca Qurbaanta Macbadka.

Intaa oo dhanse waxaa ka muhiimsan Dhawr Qoraal oo ah Qoraalo Diimeedyo ka sheekaynaya hibooyin ay Dadkii halkaas booqday ama joogay ay u sameyeen Illaahyadoo-dii “Sanamyadoodii” aan kor ku soo heegnay ee Almiqa, Casastar iyo Akhakhtin.



*SAWIR 8*

Damraan iyo Falcaan oo Reer Yahaysac ah Jifida oo ka sii ah reer Durnaan waxay u hadiyeyeen (qoraalkan) Illaahooda AKHAKHTEN ( Sanamka ) Almiqah, iyo Casastar iyo la jiranka waynaanta awoowahooda Yahaysac.


**Faahfaahin**

Damraan iyo Falcaan waa labo qof waxayna sidii cadadooda ahayd gudoonsiyeen Macbadka Qoraalkan kore ayagoo ku xusay Sanamyadii ay caabudi jireen ee Almiqah, Castar iyo Akhakhtin sidoo kale waxay xuseen awoowayaashodii hore.

ذمرن/ وفلعم /أوف لعم /بني/يه
يثع/عبد/ذربن/هقني
ي//مسَندن بـ/عثت
ر/وبـ/ إلمقهو/وبـ/أخخت
ن/وبـ/أبو همي/يهيثع

ثانياً المحتوى ويقول :

ذمرن/ وفلعم, بني يهيثع تابع ذربان أهديا (الإله) أخختن (هذا) المسند وذلك بجاه وقداسة عثتر وإلمقه وأخختن وبمقام أبيهما يهيثع .



*SAWIR 9*

Malik bin Nuceym, Masuulka Qurbaanta Macbadka waxaa u hibeeye Naftiisa Maalintii uu Cuntada ku keenay Doonyihii Yeheysic bin Sowrac isaga iyo Aabihii.

1. ملكن/ بن/ نعم/ عرب/ أخخ
2. تن/ هقني/ أخختن/ نفسهو
3. يوم/ مير/ بعم/ أبهو/ بمـ ـــ
4. [...] ركب/ يهيثع/ بن/ زورع

المعنى
مالك بن نعيم مسؤول القرابين لإلله اخختن
قدم لإلله أخختن نفسه -2
(يوم جلب الطعام مع ابيه بمراكب (اسطول -3
يهيثع بن زورع -4



*SAWIR 10*

....... Rabin bin Xadi .......
...... Yahaysic bin Zowrac .......


**Faahfaahin**

Inkastoo qayb ahaan uu burburay hadana waxaan Akhrin karnaa Labo Magac
a) Rabaan Xadi
b) Yahaythic Bin Zowrac

1. ............( ربن حدي- )......(
2. .)..........( يهيثع بن زورع- )......(
3. )........( .

والمعنى

4. .)..................( رابان حدي- )......(
5. )..........( يهيثع بن زورع- )......(



*SAWIR 11*

***Juxa bin Za'da Bin Cabdixanfar***, waxaa uu u Hadiyeey Ilaahyada Akhooka "Sanamka" Dhoon Malab ah iyo Wiilkiisii Farasnam ka dib markii loo dhiibey kaahinimada macambadka "Salmantum" ee Illaahyadda Akhookha


**Faahfaahin**

Ninkaas loogu yeero Juxa bin Za'da Bin Cabdixanfar ayaa markiisa u hadiyeeyay "Sanamka" Akhokha Dhoon Malab ah iyo Wiilkiisa Faraznam taasi waxay ka dhalatay markii laga dhigay kaahinka Macbadka.

1- جحت/ بن/زأدم/عبد /بن/حنفرم/ هقني
2- أخختن/ موس3لتن/ وبنهو/ فرزنم/ يوم
3- رشو/ أخختن/ برحبم/ بمبني/ سلمتم

المعنى

جُحة بن زأد عبد بن حنفر أهدى (الآلهة) أخوخة معسلة وابنه فرزنم وذلك عندما تولى كهانة (الآلهة) أخوخة برحاب في مبنى (معبد) سلمة



*SAWIR 12*

[............]
[...........] X [......] Y [.] W - [...]
[...] ***Yathac Amar Wathar*** ......
[...] Doonyihii Saba - [.]
[...] Saba as
[...] W N [.] [...] Y - [..]
[...] Akhakhten / W
[...] / R [..] ***Ratac*** -
[.........]

**Faahfaahin**

*Inkasta oo uu aad u burburay hadana wali waxaan akhrin karnaa magaca Boqorkii* ***Yathac Amar Wathar,*** *Doonyihii Saba Ilaha (Sanamka) Akhakhtin iyo qof magaciisa oo lagu yeero Ratac*

[…..]
1. [......]ح[...]ي[.] و – [.]
2. [.....]يثع أمر/ وتر
3. [......] /مركب/ سبأ – [.]
4. [......]وسبأ أس
5. [......] ون[.] [...]ي – [.]
6. [......]بأخختن/ و
7. [...] /ر[...]رتع....
8. – [......]

المعنى:
[......]
1. [......]ح[...]ي[.] و – [.]
2. (يثع أمر وتر]......[ (اسم ملك سبئي معروف في النقوش –
3. [.....] أسطول سبأ – [.]
4. [.....]وسبأ أس –
5. [......] ون[.] [...]ي – [.]
6. [......[بأخختن/ و –
7. [...] /ر]...[رتع –
8. 8 – [......]



SAWIR 13

..... Waxaa uu hoos dhigay naftiisa iyo xoolihiisa iyo nafta umadiisa Qacam, khidmada iyo rabitaanka Ilaha "Sanamka" Akhakhten iyo hogaaminta laxaycastin Du Xadqaan, ........sareeyihiisa Akhakhten / A'adam? "Hoog ha u sugnaado cidii burburisa dhismaha macbadka"

*Faahfaahin*

*jab soo gaaray dhagaxan gadaashiisa qofka hadlaya magaciisa lama garan karo se waxaa muuqata in uu xusey in uu hoos geeyay qabiiladiisii reer Qacam khidmada iyo rabitaanka Ilaaha (Sanamka) Akhakhten iyo hogaaminta mudane Luxaythic Duu Xadqaan waxaana u habaarayaa cidii burburisay macbadka.*
*F.G. Luxaythic wuxuu ku qoran yahay dhagaxaan kale waxaana muuqada in uu ahaa qof muhiim ah.*

[......]
1. ووضأ/ هقنيتهو/ و
2. مهرتهو/ ونفس/ أمـ
3. ته/ قعم/ بأذن/ أخ
4. ختن/ بقدمت/ لحيعثت
5. ذحدقن/ وب]...[همو/ أخختـ
6. ن/ أألطم/ بن ذثبر/ بمـ
7. بني/ رحبم

المعنى:

[......]
1. وقد وضع تقدمته و
2. ممتلكاته ونفس )حياة( أمـته
3. قعم في خدمة وإرادة اإلله أخ
4. ختن في قيادة )رعاية( لحيعثت
5. ذو حدقان في ]...[سيده أخختـ
6. )ن أألطم؟؟ من الذي يتلف )يدمر-يهلك
7. بمبنى رحاب



*SAWIR 14*

***Laxaycastin Bin Ab  Du Amrin Du Xadqaan Du Ma'ribin*** waxaa uu u hibeeyay Illaaha (Sanamka) Akhakhten caruurtiisa oo dhan iyo dhagaxa gowraca, goortii u magacaabay sareeyihiisa ***Yathac Amar Wathar*** maamulaha sahaysiinta doonyaha Saba wuxuuna masuul ka ahaa ........

[....] / W B [........] Mudane [.......] Ran macbad [......]
[......]

**Faahfaahin**

*Ninka la yiraahdo* ***Laxaycastin Bin Ab  Du Amrin Du Xadqaan Du Ma'ribin*** *oo sida muuqata qof muhiima ah, waxaa uu u hadiyeeyay Ilaha (Sanamka) Akhakhten caruurtiisa oo dhan iyo dhagaxa gowraca sababtoo ah waxaa uu ku faraxsanyahay kana mahadcelinayaa in boqorkii Saba ee waagaas* ***Yathac Amar Wathar*** u magacaabay wakiilka sahaysiinta iyo shaqadda doonyihii reer Saba.
Waxaa jira labo sadar oo burburay.

1. [......]لحيعثت /بن /أب أمر /ذحدقن /ذمريب
2. ((هقني /أخختن /كل /ولدهو /ومسلمن /يوم /هوثب(( هعتبهو-
3. مرأهو /يثع أمر /ويمرن /سوهم /بعلي /مركب /مرأهو-
4. [......]وقدم /مركب /سبأ /ويمرن /مثبتم /ويقتدم م-
5. [.]ن /وب /[......]بعل[..] /رن /وبيت- [......]
6. – [......]

:المعنى

1. [......]لحيعثت بن أب أمر ذو حدقان ذو مارب
2. (قدم لإلله أخختن كل ابنائه والمذبح عندما كلفه( عينه-
3. سيده يثع أمر مسؤل االمداد على مراكب سيدهو-
4. [......]وتولى مهمة مراكب سبأ واالمداد وكان مسؤال عن-
5. [.]ن /وب /[......]سيد[..] رن ومعبد- [......]
6. – [......]



*SAWIR 15 Dabqaad Dheer oo lagu shidi Jiray Fooxa Macbadka.*



*SAWIR 16 Dabqaad gaaban oo lagu shidi jiray Fooxa Macbadka.*



***SAWIR 17 Kursi laga sameeyey dhagax.***

***SAWIR 18 Dhagaxa gowraca qurbaanta macbadka***



*SAWIR 19 Waxa loo diyaariyey in wax lagu Qoro lagumase Qorin sabab kasta ha jirtee.*



*SAWIR 20 Wixii ka haray gidaaradii dhismihii macbadka.*



*SAWIR 21 Quruxdii dhismihii macbadka*

## Guntii Iyo Gunaandkii

Markaan isku soo ururino Natiijada ka soo baxday Qoraalada Qadiimiga ah ee kor ku qoran waxaan ku soo koobi karnaa in uu jirey Safaro malaha xambaarsanaa hami siyaasi ah iyo Ganacsi Xoog lahaa oo ay Dadkii Reer Saba ku lahayeen Xeebaha Soomaaliyeed waagii Boqorkii ***Yathar Amar Whatar Mukrab Saba***, hadaba sida u uku faanay mudanahan kor ku xusan ee ***Luheycasti Bin Ab Amrin Du Xadqan Du Marib***------ kaasi oo sheegtay inuu Boqorkaasi uu u magacaabay sahaysiinta Doonyihii Reer Saba ee halkaasi imanayey, hadaba iyadoo aan taasi ka shidaal qaadaneyno ayaan baaritaan ka dib ogaaney in Boqorkaasi uu noolaa bilowgii Qarnigii Sideedaad ee Ciise hortiis oo ka dhigan 2800 sano ka hor, waxaa Qoraalkaasi ina siiyey hadiyad qaali ah oo aan tilmaan uga qaadan karo xiliga uu shaqaynayey Macbadka **SALAMANTUM**. Se su'aashu waxaa weeye inay dhici karto inuu jirey xiriirka isu Socodka iyo Dhismaha Macbadku waayadasi kahor muddo dheer xiligan aan calaamadaynay gaar ahaa Hal Qarni ka hor markaasi oo ay calan waleynayeen Doonyihii ***Nebi Suleynaan(Cs)*** ee aadi irey ama ka imaan jirey Magaaladii dahabku warnaa ee OPHIR.

## Mahadnaq

Mahad balaaran ayaan u celinayaa Illaahay oo ii fududeeyey shaqadaan aan weligayba jeclaa, sidoo kale qoyskayga oo i siiyey Jawi wanaagsan oo aan ku qabtay shaqadan.

Mahayo kelmedo aan ugu mahad noqo Macalinka weyn Ustaad ***Cali Naasir Sawaal*** Sanca Yemen oo ku takhasusay Luuqada **Musnadka,** igana caawinayay sidii aan aad ugu fahmi lahaa Qoraaladan sidoo kale ***Professor Khalduun Nucmaan*** Madaxa Kulliyda Asaarta iyo Taariikhda ee Gobolka Damaar Yemen, sidoo kale ma ilaawi karo taageera-dii farsamo ee aan ka helay ***Iwona Gadja***,oo ka tirsan Machadka Faraha Qadiimiga ah ee Paris***, Christian Julien Robin*** oo isla xaruntaas ka tirsan iyo weliba ***Allesia Prioletta*** oo ka tirsan Xarunta Cilmi Barista Bariga Dhexe iyo Badda Cad (Mediterranean Sea) Paris.

Mana ilaawi karo ***Professor Bashiir Zandal*** oo ka tirsan Jaamacadda Damaar, oo ku takhasusay adabka Faransi-iska oo iga caawinay fahanka dhawr buug oo Afka Faransiisaka ku qornaa. Sidoo kale Xarunta Cilmi Baarista Punt- land ee **PDRC** iyo khubarada ka shaqaysa mahad aan la soo koobi karin ayaan u hayaa, gaar ahaan ***Cabdikariim Cabdiraxmaan Xaaji Xassan*** oo iga caawiyay dhanka afatirka